

عناية القرآن الكريم بالقيم الأخلاقية

Quraanka kariimka siduu ugu dadaalay qiyamka akhlaaqda

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(إِنَّ هَذَا الْقُرْآنَ يَهْدِي لِلَّتِي هِيَ أَقْوَمُ وَيُبَشِّرُ الْمُؤْمِنِينَ الَّذِينَ يَعْمَلُونَ الصَّالِحَاتِ أَنَّ لَهُمْ أَجْرًا كَبِيرًا)

(Quraankanna wuxuu ku Hanuunin Dadka Arrinta u Toosan ugana Bishaarayn kuwa fala Wanaag inay Mudan Ajir wayn), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Dhinacyada weynida quraanka kariimka lama tirin karo lamana soo koobi karo, quraanka kariimka waa xarigga Alle ee adag, waa digriga xigmadda leh, waa nuurka cad, waa waddada toosan, kaasoo aan haleelin taxriif, baadilkana imaan karo hortiiisa iyo gadaashiisa,

kamana dhergaan culimada, ku celcelintana kuma duugoobo, cajaa'ibtiisana ma dhammaato, qofkii ku hadlo run buu sheegaa, qofkii ku camalfalana ajar buu helaa, qofkii ku xukumana cadaalad buu falaa, qofkii ugu yeerana waddada toosan ayaa lagu hanuuniyaa, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

(وَنَزَّلْنَا عَلَيْكَ الْكِتَابَ تَبْيَانًا لِّكُلِّ شَيْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً وَبُشْرَىٰ لِّلْمُسْلِمِينَ)

(Waxaana kugu dajinnay Kitaab oo ah Caddaynta wax kasta iyo hanuun iyo Naxariis iyo bishaarada dadka muslimiinta ah), wuxuu leeyahay Alle:

(مَا فَرَطْنَا فِي الْكِتَابِ مِنْ شَيْءٍ)

(Waxba kagama aanan tagin Kitaabka, waxaana loo soo Kulmin Dadka Xagga Eebahood).

Waxaa ka mid ah dhinacyada weynida quraanka kariimka dadaalka uu ku dadaalayo dhismaha akhlaaqda nolosha dadka iyo ummadaha iyadoo loosoo marayo qiyam iyo mabaadi' iyo qaacidooyin nidaamiya dhaqanka aadanaha, kuwaasoo aasaasaya bulsho isku xiran oo leh naf daahir ah iyo qalbi nadiif ah, dadka bulshadaas oo iskula dhaqmaya run iyo amaano iyo naxariis iyo cadaalad, mid kaste ka mid ah wuxuu rumaysan yahay sunnada kala duwanaanta dadka dhexdooda iyo nabad in layskula noolaado, iyo dadka in la tixgaliyo in adduunka diin lagu camiro, wuxuu leeyahay Alle:

(يَا أَيُّهَا النَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَاكُمْ مِنْ ذَكَرٍ وَأُنْثَىٰ وَجَعَلْنَاكُمْ شُعُوبًا وَقَبَائِلَ لِتَعَارَفُوا إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِنْدَ اللَّهِ أَتْقَاكُمْ إِنَّ اللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ)

(Dadow waxaan idinka aburnay lab iyo dhaddig, waxaanna idinka yeelnay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, ruuxase ugu sharaf badan Alle agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Allana wax walba waa ogyahay), wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

(وَلَوْ شَاءَ رَبُّكَ لَجَعَلَ النَّاسَ أُمَّةً وَاحِدَةً وَلَا يَزَالُونَ مُخْتَلِفِينَ)

(Hadduu doono Eebahaa wuxuu ka yeeli lahaa Dadka mid kaliya mana ka suulaan inay iskhilaafsanaadaan), wuxuu leeyahay Allaha weyn:

(هُوَ أَنْشَأَكُمْ مِنَ الْأَرْضِ وَاسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا)

(Isagaana idiinka ahaysiiyey dhulka idinkuna camiray dhexdiisa).

Qofka fiirfiiriya aayadaha digriga xakiimka wuxuu si dhab u ogaanayaa qiyamka akhlaaqda ee quraanka kariimka ugu yeeray inaysan ahayn wax laga maarmi karo, meel keliya in lagaga dhaqmi karo, balse waa qiyam sugan oo aan isku baddalin isbaddalka waqtiga, sidoo kale meesha lagu sugan yahay.

Wax kaga waadaxsan ma jiro qiyamkan akhlaaqda inay ahaayeen manhaj nololeed oo uu dabbaqay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - kuna boorriyay uguna yeeray, marka la weyddiiyay mu'miniinta hooyadooda Caa'isha -Ilaahay raalli haka noqdee - nabiga dabecaddiisa qofka weyddiiyay

akhlaaq kala duwan uma tirinin waxay aaddisay quraanka kariimka, Sacad bin Hishaam - Alle ha u naxariistee - waxaa lagaga wariyay oraaqda Alle :

(وَإِنَّكَ لَعَلَىٰ خُلُقٍ عَظِيمٍ)

(waxaad ku sugan tahay dabeecad sare), wuxuu yiri: waxaan weyddiiyay Caa'isha: umulmu'miniiney iiga warran dabeecadda nabiga waxay tiri: quraanka ma akhrisaa? waxaan iri: haa waxay tiri: dabeecadda rasuulka waxay ahayd quraanka, hagidda Caa'isha qofka wax weyddiiyay waxaa ku sugan adkeyn la adkeynayo in quraanka dhammaantiisa caqiido ama shareeco ama cibaado ama mucaamalaad inuu u yahay asaas ahaan mid si xoog ugu yeera dhisidda aadanaha xagga akhlaaqda oo dhammaystiran, rasuulkuna inuu ahaa tusaalaha ku habboon dhistan dhammaan arrimaha noloshiisa.

Qiyamka ugu muhimsan waxaa ka mid ah: **in la tixgaliyo dadnimada aadanaha**, iyo in la ilaaliyo sharaftiisa oo aan la dulleysanin, kanna waa amarka Alle kitaabkiisa kariimka uu ku amray mu'minka inuu ka hufo naftiisa wax kastoo dadka dhibaya sida jeesjeeska iyo dhaajinta malada xun wuxuu leeyahay Alle:

(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا يَسْخَرْ قَوْمٌ مِّنْ قَوْمٍ عَسَىٰ أَن يَكُونُوا خَيْرًا مِنْهُمْ وَلَا نِسَاءٌ مِّنْ نِّسَاءٍ عَسَىٰ أَن يَكُنَّ خَيْرًا مِنْهُنَّ وَلَا تَلْمِزُوا أَنفُسَكُمْ وَلَا تَنَابَزُوا بِالْأَلْقَابِ بِئْسَ الْأَسْمُ الْفُسُوقُ بَعْدَ الْإِيمَانِ وَمَنْ لَّمْ يَتُبْ فَأُولَٰئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ)

(Kuwa xaqa rumeeyow yuuna yasin ragna rag (kale) waxay u dhawdahay inuu ka khayr badanyahaye, haweenna yayna haween yasin waxay u dhawyihiin inay ka khayr badanyihiine, hana ceebeynina naftiinna, hana isugu dhawaaqina naanays xun, waxaa xun magaca faasiqinimada iimaan kadib, ciddaan tawbad keeninna waa daalimiin), wuxuu leeyahay Alle:

يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اجْتَنِبُوا كَثِيرًا مِّنَ الظَّنِّ إِنَّ بَعْضَ الظَّنِّ إِثْمٌ وَلَا تَجَسَّسُوا وَلَا يَغْتَب بَّعْضُكُم بَعْضًا أَيُحِبُّ أَحَدُكُمْ أَنْ يَأْكُلَ لَحْمَ أَخِيهِ مَيْتًا فَكَرِهْتُمُوهُ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ تَوَّابٌ رَّحِيمٌ

(Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada wax badan oo mala ah, maxaayeelay malaha qaarkiis waa dambi, hana is jaasusina, qaarkiinna qaar yuusan xamanin, miyuu jecel yahay midkiinna inuu cuno Hilibka walaalkiis oo mayd ah, waad neceb tihiin arrintaa, Eebana ka dhawrsada waa tooba aqbale naxariistee).

Quraanka kariimka wuxuu amrayaa daaharada qalbiga iyo ka dhowrasanaado xumaanta oo dhan iyo cuqdada, sidoo kale dadka malo xun inaan loo maleynin, wuxuu yiri Alle:

لَوْلَا إِذْ سَمِعْتُمُوهُ ظَنَّ الْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ بَأَنفُسِهِمْ خَيْرًا وَقَالُوا هَذَا إِفْكٌ مُّبِينٌ

(Maxaydaan markaad maqasheen xaalka (qadafka) ayna ugu malayn mu'miniinta ragga iyo haweenka

naftooda khayr, oyna u dhihin kaasi waa been abuur cad).

Sidoo kale qiyamka quraanka ku dadaalay inuu sugo: waa isbahaysiga iyo isukaalmaynta iyo isu naxariisashada, wuxuu amray quraanka kariimka bulshada dhammaan inay isugu kaalmeeyaan wanaagga iyo taqwada, wuxuu yiri Alle:

(وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَىٰ وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ)

(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu kaalmaynina dambi iyo colnimo), isu kaalmeynta bulshada dhexdeeda waxay ka mid tahay waxyaalaha xoojiya dowladda, amaanka bulshadana suga, qof kaste wuxuu u socdaa inuu dantiisa gaaro kuna dadaalo siduu ku heli laa, marka bulshada ay iskaashanayso qofka wuu qaboobaa naftiisana way u degaysaa waxaase dhacda inuu isaga u degdego inuu bulshada u gargaaro inuu awoodo, maxaa ka fiican qofka yiri:

الناس للناس من عرب ومن عجم * بعض لبعض وإن لم يشعروا خدم.

Dadka dad ayay u sugan yihiin carab iyo cajamba *

Qaarna qaarka kale ayay u adeegaan xataa haddaysan dareemin.

Wuxuu ku tilmaamay nabiga axaadiis qiima badan qiimaha uu leeyahay isu gargaarka wuxuu yiri:

(مَثَلُ الْمُؤْمِنِينَ فِي تَوَادُّهِمْ وَتَرَاحُمِهِمْ وَتَعَاطُفِهِمْ مَثَلُ الْجَسَدِ ، إِذَا

اشْتَكَى مِنْهُ عَضُوٌّ تَدَاعَىٰ لَهُ سَائِرُ الْجَسَدِ بِالسَّهْرِ وَالْحُمَّى)

(Mu'miniinta tusaalahooda xagga isjacaylkooda iyo isu naxariisashadooda iyo isu dhimrintooda waa sida jirka oo kale, marka xubin ka sheegato jirka oo dhan dhafar iyo qandho ayuu ka sheegtaa), wuxuu yiri:

(المُسْلِمُ أَخُو الْمُسْلِمِ ؛ لَا يَظْلِمُهُ ، وَلَا يُسْلِمُهُ ، وَمَنْ كَانَ فِي حَاجَةِ
أَخِيهِ كَانَ اللَّهُ فِي حَاجَتِهِ ، وَمَنْ فَرَّجَ عَنْ مُسْلِمٍ كُرْبَةً فَرَّجَ اللَّهُ عَنْهُ
كُرْبَةً مِنْ كُرْبَاتِ يَوْمِ الْقِيَامَةِ ، وَمَنْ سَتَرَ مُسْلِمًا سَتَرَهُ اللَّهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ)

(Muslinka waa muslinka kale walaalkii, ma dulmiyo cadowna uma dhiibo, qofka danta walaakiisa ka shaqeeyo Ilaahay ayaa dantiisa u fulinayo, qofka ka feydo muslin kurbo Ilaahay wuxuu ka feydayaa kurbo ka mid ah kurbooyinka maalinta qiyaame, qofka muslin asturo Ilaahay maalinta qiyaame ayuu asturayaa).

Qiyamkan waxaa ka mid ah: **qiimaha fikirka iyo shaqaysiinta caqliga**, wuxuu amray Alle (cazza wajalla) addoomihiisa inay ku fikiraan malakuudka samadaha iyo dhulka, wuxuu ammaanay Alle kuwa fikira, wuxii yiri:

(إِنَّ فِي خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاخْتِلَافِ اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ لآيَاتٍ لِأُولِي
الْأَبْصَارِ * الَّذِينَ يَذْكُرُونَ اللَّهَ قِيَامًا وَقَعُودًا وَعَلَىٰ جُنُوبِهِمْ وَيَتَفَكَّرُونَ فِي
خَلْقِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ رَبَّنَا مَا خَلَقْتَ هَذَا بَاطِلًا سُبْحَانَكَ فَقِنَا عَذَابَ
النَّارِ*)

(Abuuridda cirirka iyo dhulka iyo is khilaafidda habeenka iyo maalinta calaamooyin ayaa ugu sugan kuwa caqliga leh * ee ah kuwa ku xusa Alle taagni iyo fadhi iyo jiifba, oo ku fikira abuuridda cirirka iyo dhulka (iyagoo dhihi) rabbiyow umaadan abuurin kan baadil (ciyaar) waad nasahan tahay ee naga kori cadaabka naarta), wuxuu yiri Alle:

(أَوَلَمْ يَنْظُرُوا فِي مَلَكُوتِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ)

(Miyeyna dayin xukunka samooyinka iyo dhulka), wuxuu noo furay albaabka tadaburka iyo fikirka, wuxuu yiri subxaanahu:

(اللَّهُ الَّذِي رَفَعَ السَّمَاوَاتِ بِغَيْرِ عَمَدٍ تَرَوْنَهَا)

(Eebe waa kan koryeela Samooyinka Tiir La'aan aad Aragtaan), wuxuu yiri Alle:

(قُلْ أَرَأَيْتُمْ إِنْ جَعَلَ اللَّهُ عَلَيْكُمُ اللَّيْلَ سَرْمَدًا إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ مَنْ إِلَهٌ غَيْرُ اللَّهِ يَأْتِيكُمْ بِضِيَاءٍ أَوْ لَيْلٍ تَسْمَعُونَ)

(Waxaad Dhahdaa bal Warrama Hadduu ka Yeelo Eebe Korkiinna Habeen Joogta ah tan iyo Qiyaamada waa Kee Eebaha ka soo Hadhay Ilaahay ee idiin keeni Nuur miyaydaan wax Maqlayn), sidoo kale wuxuu na maray inaan ku fikirno nafta, wuxuu yiri:

(أَوَلَمْ يَتَفَكَّرُوا فِي أَنفُسِهِمْ)

(Miyeyna ka fikirin naftooda), wuxuu yiri:

(وَفِي الْأَرْضِ آيَاتٌ لِلْمُوقِنِينَ * وَفِي أَنفُسِكُمْ أَفَلَا تُبْصِرُونَ)

(Dhulkana waxaa ugu sugan calaamooyin kuwa wax yaqiinin * Naftiinna miyaydaan arkaynin).

Quraanka kariimka wuxuu noogu furaa albaabka fikirka wax kaste qofka wax u taraya, fikirkanna waa cibaado way fahmeen asxaabta iyo taabiciinta, ujeeddadeedana way garteen, wuxuu leeyahay Abu dardaa -Ilaahay raalli haka noqdee -: saacad in la fikiro waxay ka khayr badan tahay habeen in salaad lagusoo jeedo, wuxuu leeyahay Wahab bin Munabih - Alle ha u naxariistee -: ma dheeraado fikirka qofka waligii hadday dhacdo fahan buu gaaraa, ma fahmo hadday dhacdana wuu ogaanayaa, ma ogaadoo hadday dhacdana wuu camalfalaa.

Waxaa ka mid ah: **qiimaha wada hadalka iyo tixgalinta dadka**, in badan ka mid ah aayadaha quraanka waxay umadda ku hanuuniyaan balse dadka oo dhan ahamiyada uu ku leeyahay wada hadalka nolosha dadka, wada hadalka waa qaabka Alle raalli ka noqday inuu manhaj u noqdo anbiyada iyo rususha si ay u gaarsiiyaan risaaladiisa dadka, taas oo ah islaamka inuu rummeysan yahay xoriyada caqiidada, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah:

(لَا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ قَدْ تَبَيَّنَ الرُّشْدُ مِنَ الْغَيِّ)

(Qasab ma aha diinta galiddeedu, hanuunka waa ka cadaaday (soocan yahay) baadida). waa kanaa Nabi Nuux - nabadgelyo korkiisa ha haatee - oo kala hadlaya

dadkiisa mowqif ka mid ah mawaaqifta dacwadiisa dheerayd asoo leh:

(... يَا قَوْمِ أَرَأَيْتُمْ إِنْ كُنْتُمْ عَلَىٰ بَيِّنَةٍ مِّن رَّبِّي وَآتَانِي رَحْمَةً مِّن عِنْدِهِ فَعُمِّيَتْ عَلَيْكُمْ أَنُلْزِمُكُمُوهَا وَأَنْتُمْ لَهَا كَارِهُونَ)

(...Qoomkayow ka warrama haddaan Xujo (cad) oo Eebahay ku sugnahay uu ina siiyay naxariis Xaggiisa oo Laydinka indho tiray miyaan idin ku qasbi karraa idinkoo nici), waa kanaa nabi Ibaraahiim - nabadgelyo korkiisa ha haatee - oo xujada ku oogaya boqorka xadgudbay asoo wada hadal caqli ku dhisn la galaya, quraanka kariimka ayaa noogu sawirayaa oraahda Alle:

(الَّذِي تَرَىٰ إِلَىٰ الْآلِي الْآلِي حَاجَّ إِبْرَاهِيمَ فِي رَبِّهِ أَنْ آتَاهُ اللَّهُ الْمُلْكَ إِذْ قَالَ إِبْرَاهِيمُ رَبِّيَ الَّذِي يُحْيِي وَيُمِيتُ قَالَ أَنَا أَحْيِي وَأُمِيتُ قَالَ إِبْرَاهِيمُ فَإِنَّ اللَّهَ يَأْتِي بِالشَّمْسِ مِنَ الْمَشْرِقِ فَأْتِ بِهَا مِنَ الْمَغْرِبِ فَبُهِتَ الَّذِي كَفَرَ وَاللَّهُ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ)

(Ka warran kii kula murmay Nabi Ibraahim Eebiis, (waa Namruud) in Alle siiyay xukun markuu Nabi Ibraahim yiri Eebahay waa Nooleeye Dile, markaas yiri (Gaalkii) amba waan nooleeyaa oon dilaa, markaas Nabi Ibraahim yiri Eebe wuxuu ka keeni Qoraxda Bari ee ka keen Galbeed, markaasaa la wareeriyay (oo aamusay) kii gaaloobay, Eebana ma hanunniyo Qoom daalimiin ah), isla manhajka waxaa qaatay nabi Muuse - nabadgelyo korkiisa ha haatee - markuu la hadlayay Fircoon, wuxuu leeyahay Alle:

(قَالَ فِرْعَوْنُ وَمَا رَبُّ الْعَالَمِينَ * قَالَ رَبُّ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا بَيْنَهُمَا
 إِنَّ كُنْتُمْ مُوقِنِينَ * قَالَ لِمَنْ حَوْلَهُ أَلَا تَسْتَمْعُونَ * قَالَ رَبُّكُمْ وَرَبُّ آبَائِكُمُ
 الْأُولِينَ * قَالَ إِنَّ رَسُولَكُمْ الَّذِي أُرْسِلَ إِلَيْكُمْ لَمَجْنُونٌ * قَالَ رَبُّ الْمَشْرِقِ
 وَالْمَغْرِبِ وَمَا بَيْنَهُمَا إِنَّ كُنْتُمْ تَعْقِلُونَ * قَالَ لَنْ اتَّخَذتَ إِلَهًا غَيْرِي لِأَجْعَلَنَّكَ
 مِنَ الْمَسْجُونِينَ *)

(Fircoon wuxuun Yidhi waa maxay Eebaha Caalamka
 * Wuxuu Yidhi (Nabi) Muuse waa Eebaha Samooyinka
 iyo Waxa u Dhaxeeya haddaad wax Yaqiinsanaysaan
 (Rumaynaysaan) * Wuxuu ku Yidhi (Fircoon) kuwii
 Gaararkiisa ahaa War ma Maqlaysaan * Wuxuu Yidhi
 Nabi Muuse waa Eebihiin iyo Eebaha Aabayaalkiinii
 Hore * Wuxuu Yidhi Fircoon Rasuulkiinna laydiin soo
 diray waa Waalan yahay * Wuxuu Yidhi Nabi Muuse
 waa Eebaha Bari iyo Galbeed iyo Waxa u Dhaxeeya
 Haddaad wax kasaysaan * Wuxuu Yidhi Fircoon
 haddaad Yeelato Ilaah iga soo Hadhay waxaan kaa
 Yeeli kuwa Xabbisan)

Sugidda quraanka kariimka qiimaha wada hadalka
 waxaa ku sugan ugu yeerid sarreynta aadanaha iyo
 tixgalinta aadanaha isagoon la eegin midabkiisa iyo
 diintiisa iyo jinsigiisa, iyadoo la tuurayo fiirinta
 kalinimada oo midabtakoor ah iyo is sarreysiin, wuxuu u
 ilaaliyay quraanka kariimka jinsiga basharka
 karaamadiisa insaaniyadiisa darteed ee wax kale ma
 aha, wuxuu qiray in asalkiisa mid yahay si kastoo ay
 jinsiyadaha isu baddalaan, wuxuu leeyahay Alle:

(وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِي آدَمَ وَحَمَلْنَاهُمْ فِي الْبَرِّ وَالْبَحْرِ وَرَزَقْنَاهُمْ مِنَ الطَّيِّبَاتِ وَفَضَّلْنَاهُمْ عَلَى كَثِيرٍ مِمَّنْ خَلَقْنَا تَفْضِيلًا)

(Dhabbaanu u sharrifnay Binii Aadamka waxaana ku xambaarnay Barriga iyo Baddaba waxaana ku arsaaqnay wanaag, waxaana ka fadilnay wax badan oo ka mida waxaan Abuurnay fadilaad), wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

(يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَّ مِنْهُمَا رِجَالًا كَثِيرًا وَنِسَاءً وَاتَّقُوا اللَّهَ الَّذِي تَسَاءَلُونَ بِهِ وَالْأَرْحَامَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ رَقِيبًا)

(Dadow ka Dhawrsada Eebihiina Idinka Abuuray Naf kaliya (Adam) kana Abuuray xaggeeda Haweenaydeeda (Xaawo) kana Abuuraay Xagooda Rag Badan iyo Haweenba, ka Dhawrsada Eebihiina aad wax isku Warsataan iyo Qaraabada, Eebana wuxuu u Yahay Korkiina Ilaaliye)

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa

sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Walaalaha islaamka ahow:

Qiyamka akhlaaqda Quraanka kariimka ugu yeeray waxaa ka mid ah: celinta nafta iyo cabburinta carada, waxaa la og yahay aadnaha noloshan inuusan ka badbaadaynin inuu la kulmo qaar mawaaqifta ka mid ah ama dhacdooyinka oo keeni kara inay ka xanaajiyaan, nafta aadanahana way ka xanaaqaysaa waxa ay maqlayso ama ay arkayso, nusuusta quraanka waxay ugu yeeraysaa in la celiyo nafta caradana la cabburiyo, iyo in la qaado waddada cafiska, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

(وَسَارِعُوا إِلَىٰ مَغْفِرَةٍ مِّن رَّبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا السَّمَاوَاتُ وَالْأَرْضُ أُعِدَّتْ
لِلْمُتَّقِينَ * الَّذِينَ يُنْفِقُونَ فِي السَّرَّاءِ وَالضَّرَّاءِ وَالْكَاظِمِينَ الْغَيْظَ وَالْعَافِينَ
عَنِ النَّاسِ وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ *)

(Una deg daga Dambi dhaafka rabbigiina iyo Janno Ballaarkeedu yahay cirarka iyo Dhulka oo loo darbay kuwa dhawrsada * Ee ah kuwa wax bixiya Waqtiga Ladnaanta iyo Dhibkaba, ee Damiya Cadhada ee iska

Cafiya Dadka, Eebana waa Jecel yahay Samafalayaasha), wuxuu leeyahay Alle:

(وَلَا يَأْتِلْ أَوْلُو الْفَضْلِ مِنْكُمْ وَالسَّعَةِ أَنْ يُؤْتُوا أُولِي الْقُرْبَىٰ وَالْمَسَاكِينَ
وَالْمُهَاجِرِينَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ ۗ وَلْيَعْفُوا وَلْيَصْفَحُوا ۗ أَلَا تُحِبُّونَ أَنْ يَغْفِرَ اللَّهُ
لَكُمْ ۗ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ)

(Yeyna ku dhaaranin kuwa Fadliga (dheeraadka) leh iyo hodannimada inayan wax siinayn qaraabada, iyo masaakiinta iyo kuwa ku hijrooda Jidka Alle, hana iska cafiyaan hana saamaxaan, miyeydaan jecelayn inuu idiin dhaafo Alle, Ilaahayna waa dhaafe naxariista)

wuxuu leeyahay Alle:

(وَلَا تَسْتَوِي الْحَسَنَةُ وَلَا السَّيِّئَةُ ۗ ادْفَعْ بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ فَإِذَا الَّذِي بَيْنَكَ
وَبَيْنَهُ عَدَاوَةٌ كَأَنَّهُ وَلِيٌّ حَمِيمٌ)

(Mana eka Wanaag iyo Xumaan, reeb oo (bixi) arrinta fiican markaas waxaa soobixi in midkii col idin dhexyiil uu noqon sokeeye iyo saaxiib), wuxuu leeyahay subxaanahu:

(فَمَنْ عَفَا وَأَصْلَحَ فَأَجْرُهُ عَلَى اللَّهِ)

(Ruuxiise iska cafiya oo wanaajiya ajrigiisa Eebaa siin).

Qiyamka waxaa ka mid ah: **dhexdhexaadinta**, maxaa ka badan aayadaha quraanka kariimka oo amraya dadka in la dhexdhexaadiyo, waxayna u bishaareynayaan ajar weyn, wuxuu yiri Alle:

(لَا خَيْرَ فِي كَثِيرٍ مِنْ نَجْوَاهُمْ إِلَّا مَنْ أَمَرَ بِصَدَقَةٍ أَوْ مَعْرُوفٍ أَوْ إِصْلَاحٍ بَيْنَ
النَّاسِ وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ ابْتِغَاءَ مَرْضَاةِ اللَّهِ فَسَوْفَ نُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا)

(Khayr ma leh wax badan oo Faqooda ah, oon ahayn mid fara Sadaqo ama Wanaag ama Hagaajin Dadka dhexdooda, Ruuxii fala Saas doonid raalli ahaanshaha Eebe waxaanu siin Ajir wayn), wuxuu leeyahay subxaanahu:

(فَمَنْ خَافَ مِنْ مُوصٍ جَنَفًا أَوْ إِثْمًا فَأَصْلَحَ بَيْنَهُمْ فَلَا إِثْمَ عَلَيْهِ إِنَّ اللَّهَ غَفُورٌ
رَحِيمٌ)

(Ruuxii uga cabsada dardaaran iilasho ama dambi oo hagaajiya dhexdooda, korkiisa danbi masaara, Eebana waa dambi dhaafbadane naxariis badan), wuxuu leeyahay Allaha weyn:

(وَيَسْأَلُونَكَ عَنِ الْيَتَامَىٰ ۖ قُلْ إِصْلَاحٌ لَهُمْ خَيْرٌ ۗ وَإِنْ تُخَالطُوهُمْ فَاخْوَانُكُمْ
ۗ وَاللَّهُ يَعْلَمُ الْمُفْسِدَ مِنَ الْمُصْلِحِ ۗ وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَأَعْتَبَكُمْ ۗ إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ
حَكِيمٌ)

(waxayna ku waydiin agoonta, waxaad dhahdaa wanaajintooda yaa kahyr badan, haddaad dheehdaanna waa Walaalihin, Eebana waa ogyahay cidda wax fasaadin iyo kan hagaajin, haduu doono Eebana wuu idin dhibi lahaa, Eebana waa adkaade falsan), wuxuu Alle u digay digniin daran kuwa fasahaadinaya dadka dhexdooda, wuxuu yiri Alle:

(وَمَنْ النَّاسِ مَنْ يُعْجِبُكَ قَوْلُهُ فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا وَيُشْهَدُ اللَّهُ عَلَىٰ مَا فِي قَلْبِهِ
وَهُوَ أَلَدُّ الْخِصَامِ * وَإِذَا تَوَلَّىٰ سَعَىٰ فِي الْأَرْضِ لِيُفْسِدَ فِيهَا وَيُهْلِكَ الْحَرْثَ

وَالنَّسْلُ ۖ وَاللَّهُ لَا يُحِبُّ الْفَسَادَ * وَإِذَا قِيلَ لَهُ اتَّقِ اللَّهَ أَخَذَتْهُ الْعِزَّةُ بِالْإِثْمِ ۖ
فَحَسْبُ جَهَنَّمَ ۖ وَلَيْئَسَ الْمِهَادُ

(Dadka waxaa ka mid ah mid ku yaab galin hadalkiisu noloshan adduun, maragna gashay Alle waxa qalbigiisa ku sugan, isagoo dood badan * markuu jeedsadana, socda dhulka fasaad dartii iyo inuu halligo beeraha iyo faracaba, Eebana ma jecla fasaadka * marka lagu dhoho ka dhawrso Eebana waxa qabata isla weyni dambi dartiis, waxaa ku filan jahannamo iyadaana u xun gogol).

Maxaa inooga baahi badan inaan qabsano qiyamka akhlaaqda oo kitaabka Alle ugu yeeray nabigeena suubbaanaa dabbaqay, ilaa aan ka gaarno wixii ay gaareen awooweyaasheena ee xadaaro ah iyo horumar iyo korreyn, maxaa ka fiican Showqi markuu yiri:

وَإِنَّمَا الْأُمَّمُ الْأَخْلَاقُ مَا بَقِيَتْ * فَإِنَّهُمْ ذَهَبْتُمْ أَخْلَاقَهُمْ ذَهَبُوا

Ummadaha way jirayaan hadday akhlaaq jirto * hadday tagtana way ragayaan

Ilaahayow nagu hanuuni akhlaaqda tan ugu fiican, kumana hanuuniyo midda fiican qofaan adiga ahayn, tan ugu xunna naga leexi kamana leexiyo midda xun qofaan adiga ahayn, noo ilaali dalkeena iyo dadkeena iyo ciidankeena iyo nabadsugiddeena, naguna arsaq nabad iyo amaan iyo dhammaan dalalka caalamka.

